

BANUCA

Basic Numerical and Calculation Abilities

**Imtixaanka Xisaabaha iyo aqoonta tirada
Turjumaad: [Imtixaanka xisaabaha iyo aqoonta tirada]**

**Habka shaqada
[Soomaali]**

Turjumaad

[Fadumo Bile Abokor]



**© 2003
Pekka Räsänen**

Bogga 2aad – Layliga 1aad: Isbarbardhigga: qiyaasaha

Xusuus:	Hubi, in shaqada bogga 2aad diyaar kuu tahay.
---------	---

Bog kasta cidhifkiisa(cirifkiisa) waxa ku yaal sawir, kugu caawinaya sidii aad u fahmi lahayd, in aad waxyaalaha lagaa rabo ugu hesho meeshii saxda ahayd ee ku habbooneyd.

Tilmaanta bogga:		Shimbir
---------------------	---	---------

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa (marka koox la imtixaanayo waa in wax loo weydiyaa koox ahaan)

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

“.Ha ka qaadin qalinka miiska illaa laguu fasaxo, si fiican u dhegeyso halkan meeshan madow (*Ka tus meesha buugaaaga shaqada.*) Wuxaad aragtaa laba sanduuq, kuwaasoo ay ku dhex jiraan tiro kubbado ah oo kala duwan. Fiiри oo eeg su'aasha koowaad, sanduuqa tirada badan waa la calaamadiyey (*Tus*) sidoo kale waxaa loo calaamadiyey kan ku xiga. U calaamadee hadda sidaa hore oo kale, sanduuqyada hoose, kuwa tirada badan ee kubbadaha ahi ku jiraan. Uma baahnid inaad kubbadaha tiriso, calaamadee kuwa u eg inay tiro badan yihiin.
Hadda (*imminka*) qaado qalinka oo bilow shaqada.”

Waqtigu waa: 3 daqiiqadood (minit)

(Waqtigu wuxuu bilaabmayaa marka ay dhammaato tusaaleytu.)

3 daqiigo ka dib cilmibaaruuhu wuxu oranayaa:

Fiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo bogga kale soo rog.

Bogga 3aad – layliga 2aad: Xisaabin: Isugeyn

Xusuus	Hubi, in saqada bogga 3aad diyaar kuu tahay
Tilmaanta bogga:	 Jiir(doolli)

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

"Ha ka qaadin qalinka miiska illaa laguu fasaxo. Si fiican u dhageyso! Halkan (Ka tus buugaaga shaqada) waxaa ah laba tiro iyo calaamadda isugeynta (+) taasoo macnaheedu yahay in la isugeynayo ama la isku darayo laba tiro. Tusaale; Marka aad haysato laba ee loo geeyo hal, waxay noqoneysaa seddex. Jawaabta waxa lagu qorayaa xarijinta jawaabta. Shaqada kale waa la isku geynayaa ama la isku darayaa 1 iyo 9. Halkaa ka sii wad xisaabaha kale. Isku day ina aad ka shaqeysa inta ugu badan ee suurtagal ah . Markaad sameyso shaqada, qalinka miiska korkiisa dhig. Hadda waad qaadan kartaa qalinka si aad shaqada isugeynta u bilowdo."

**Waqtigu
waa:** 4 daqiiqo (minit)

4 daqiiqo ka dib cilmibaaruuhu wuxu oranayaa:

Fiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo soo rog bogga kale.

Bogga 4aad - Layliga 3aad: Isle'ekaanta: qiyaasta iyo tirada

Xusuuso:	Hubi, in shaqada bogga 4aad diyaar kuu tahay.
Tilmaanta bogga	 kubbad(banooni)

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa :

"Ha ka qaadin qalinka miiska illaa aan kuu ogolaado.Si fiican u dhegeyso! Shaqadan waxaa calaamad la kor dhigay tiro, taas oo la mid ah dhibcaha sawirka dhinaca kale ku yaal. Halkan (ka tus buugaaga shaqada). Shaqada hore waxaa ku yaal laba dhibcood, sidaa daraadeed waxaa calaamadda la kor dhigay tirada laba. Ka xigaa waa (Tus) shan dhibcood waxana calaamadda lagu dhigay tirada shan, shaqooyinka ka danbeeya, calaamadee tirada la qiyaasta ah, tiro walba makaad dhammeys, dhig qalinka miiska korkiisa."Hadda qalinka qaado oo bilow shaqada.

**Waqtigu
waa:** 4 daqiiqo (minit)

4 daqiiqo ka dib cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa

Fiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo soo rog bogga kale.

Bogga 5aad – layliga 4aad: Xisaabin: kalajar (kalagoo)

Xusuus:	Hubi, in shaqada 5aad diryaar kuu tahay.
Calaamadda bogga:	 Ubax

Cilmibaaruuhu wuxuu oranaya:

“Ha ka qaadin qalinka miiska illaa aan kuu ogolaado. Si fiican u dhegeyso! Halkan (*ka tus buugaaga shaqada*) waxaa kuu yaal tiro iyo calaamadda kala goynta (–), taasoo macneeedu yahay, in tirada hore laga goynayo tirada danbe. Tusaale, marka aad laba haysato ee laga gooyo ama laga jaro hal. Jawaabtu waa hal, waxaana lagu qorayaa xariijnta jawaabta. Shaqada ku xigta, shan ayaa afar laga jarayaa, sidaa oo kale shaqada u sii wad. Ku dadaal in aad ka shaqayso inta ugu badan ee suurtagal ah. Marka aad dhammeyso, qalinka miiska kor dihg. Hadda qalinka gacanta ku qaado oo xisaabta kala jar”

**Waqtigu
waa:** 4 daqiiqo (minut)

4 daqiiqo ka dib cilmbaaruuhu wuxuu oranaya:

Fiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo soo rog bogga kale.

Bogga 6aad – Layliga 5aad: Iskuxigidda tirooyinka

Xusuus:	Hubi , in shaqada bogga 5aad diyaar kuu tahay.
Calaamadda bogga:	 Quraanjo

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

“Ha ka qaadin qalinka miiska korkiisa illaa aan kuu fasaxo. Halkan waxaa aha laba tiro oo isku xiga (*Ka tus buugaaga shaqada*): *laba iyo saddex. Waa maxay tirada ku xigtaa ? Laba iyo sadex waxa ku sii xigta afar. Sidoo kale ku qor meesha bannaan tirada ku xigta tirada qoran. Halkan ka bilow (Tus): shan, lix maxaa ku xiga? qaad qalinka oo shaqada bilow* ”

**Waqtigu
waa:** 4 minut (Daqiiqo)

4 daqiiqo ka dib cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

Fiiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo soo rog bogga kale.

Bogga 7aad – Layliga 6aad : isbarbardhingga tirooyinka

Xasuus:	Hubi, in shaqada bogga 7aad diyaar kuu tahay.
Calaamadda bogga:	 Maroodi

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

"Ha ka qaadin qalinka miiska korkiisa illaa laguu ogalaado. Si fiican u dhegeyso! Halkan waxaa ah safaf, kuwaas oo tirooyn ah (ka tus buugaaga shaqada): waxaa halkan ku qoran tirooyinka 2,4,1 iyo 3. afar ayaa ugu badan waana tirada la calaamadiyey. shaqada kale ka shaqee, meesha waxaa ah 2,3,7 iyo 6. Hadda waad qaadan kartaa qalinka adigoo bilaabaya shaqada. Markaad dhameyso shaqada. Dhig qalinka miiska korkiisa.

**Waqtigu
waa:** 4 minut (Daqiiqo)

4 daqiiqo ka dib cilmibaaruuhu wuxu oranayaa:

Fiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo soo rog bogga kale

Bogga 8aad – Layliga 7aad: Iskudhigma: Odhaah(oraah) iyo tiro

Xusuus:	Hubi , in shaqada bogga 8aad diyaar kuu tahay.
Tilmaanta bogga:	 Eey

Cilmibaaruuhu wuxuu oranaya:

Kor ha u qaadin gallinka illaa aan ku dhaho qaad. Si fiican u dhegeyso. Halkan waxaa ah safaf(layman) kuwaasoo ah tirooyin (*Ka tus buugaaga shaqada*)*layn(saf)* *kasta waxaan kaaga sheegayaa hal tiro, waxa lagaa rabaa inaad calaamadeys*o *tiradaa. Fiiri oo eeg safka hore tusaale (Tus) waxan oranayaa*" afar. *Ka raadi safka hore tirada afar. Tiradaa calaamad ayaa lagu dhigay*"*Hadda waa markaaga. Qaado qalinka oo laynka xiga calaamadee tirada sagaal. Sagaal.*"

Xusuus:	Xusuuso in aad tartiib iyo si habsan ugu sheegto tirada Mar labaad ugu celi. Waxaad oranseysaa " laynka danbe waa tirada XX, XX".
---------	--

Tilmaan:	Haddii shaqeeyuhu isku qaldo laymanka. Waad yara tilmaami kartaa adigoo xarafka layka ugu horreeya u sheegaya: "Laynka, haddii uu xarraf ku bilaabmayo Y (marka koox la imtixaamayo waxaad ugu qori kartaa sabuuradda), XX, XX.
----------	---

Waqtiga: 20 ilbidhksi (seken) sii qayb kasta oo ka mid ah shaqadan.

Tirooyinka la dhahayaa waa:

9	sagaal
18	sideed tobaniyo sideed(tobaniyo siddeed)
25	Labaatan iyo shan (shan iyo labaatan)
73	todobaatan iyo saddex (saddex iyo todobaatan)
102	boqol iyo laba
504	shan boqol iyo afar
4 012	afar kun iyo tobaniyo laba (afar kun iyo laba iyo tobaniyo)
10 004	tobaniyo afar.

Qaybta ugu danbeysa marka la dhammeeyo, 20 seken ka dib cilmibaaruuhu wuxu oranaya:

Fiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo soo rog bogga kale.

Bogga 9- Layliga 8aad : Xisaabin: Xisaabo

Xusuus:	Hubi, in shaqada bogga 9aad diyaar tahay.
Tilmaanta bogga:	 Baaskiil(bushkaleeti)

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

Ha qaadin qalinka ilaa laguu fasaxo. Si fiican u dhegeyso. Halkan waxaa ah shaqo la xisaabinayo, tirooyin badan iyo kuwo yaryar. (*Ka tus buugaaga shaqada*). Ku dadaal inaad ka shaqyso inta ugu badan , una fiiro, miyaa la kala jarayaa mise waa la isku geynayaa. Markii aad dhammeysyo, dhig qalinka miiska korkiisa. Hadda qaado qalinka oo billow shaqada.

Waqtiga: 6 taqiilo (minit)

6 minit ka dib cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

Fiiican, dhig qalinka miiska korkiisa oo soo rog bogga kale

Bogga 10 – Layliga 9aad: Go'aaminta xisaabaadka

Xusuus:	Hubi, in bogga shaqada ee 10aad diyaar kuu yahay.
Tilmaanta bogga:	 Bisad(mukulaal)

Cilmibaaruuhu wuxuu oranayaa:

“ Ha qaadin qalinka illaa laguu fasaxo. Si fiican u dhegeyso. Halkan dhinaca bidixda (*Ka tus meesha buugaaga shaqada*), waxaa ah saddex tiro, kuwaas oo isku xigxiga. Halkan, dhinaca kale, (*Tus*) waxaa ah tiro ku sii xigi karta tirooyinkii hore. Fiiri oo eeg laynka hore: tirooyinka hore waxay ka bilaabmaan kow, laba, saddex waxaa ku haboon in lagu sii biiriyo triada afar, oo ku sii xigi karta tirooyinka hore. Markaa waxa la calaamadiyey afar. Tirooyinka ku xigaa waa 2,4,6 waxaana ku sii xigi karta tirada 8. Sidoo kale uga shaqee shaqooyinka soo socda . Mar kasta hal tiro calaamadee, tiradaasoo ah ta ku sii xigi karta ee ku habboon tirooyinka isku xiga. Wakhtiga shaqadu waa 8 minit. Hadda qaado qalinka oo bilow.

Wakhtigo: 8 minut (daqiicho)

8 minit kadib cilmibaaruuhu wuxuu oronayaa:

“Dhig qalinka miiska korkiisa. Shaqadu way dhammaatay.